

Ilmaha yaryar, astaamaha ugu waawayn ee meningitis waxaa ka mid noqon kara:

- oohin cod dheer iyo taahin leh
- xanaaq badan marka la qabto/qaado
- dawakhsanaan, adag in laga toosiyo hurdada
- jilicsanaan iyo tabar la'aan ama ku adag dhaqdhaqaaqyada gariirinta ah
- maqaar midab cirro leh, bararsan ama buluug isu beddelaya
- qandho, gacmaha iyo cagaha oo qabow ah
- dhibco casaan ama guduud-xigeen ah oo aan ku baaba'ayn cadaadis. (Sameey tijaabada galaaska ee hoos lagu sharraxay.)

i Haddii aad si adag muraayad/galaas ugu riixdo finan, finanka ma baaba'ayaan. Waxaad awoodi doontaa inaad finanka ka dhex aragto galaaska. Haddii ay taasi dhacdo, isla markiiba raadso caawimaad dhakhtar.

Waxaa laga yaabaa inay adkaato in finanka laga arko maqaarka madow ama buniga ah. Hubi meelaha cadcad sida calaacalaha gacanta ama dhanka hoose ee cagaha, saqafka afka, caloosha, qaybaha cadaanka ah ee indhaha ama gudaha indhaha.




Sawirka waxaa bixiyay Meningitis Now meningitisnow.org



Sawirka waxaa bixiyay Meningitis Research Foundation meningitis.org


Jadwalka tallaalada carruurnimada ee joogtada ah



Haddii ilmahaaga uu ku xanuunsado uuna yeesho **mid ama in ka badan** oo ka mid ah calaamadahan ama astaamahan, si degdeg ah ula xiriir dhakhtarkaaga.

Haddii aad wali walwalsan tahay ka dib markaad hesho talo, ku kalsoonow dareenkaaga oo ilmahaaga u kaxeey isbitaalka kuugu dhow ee leh waaxda gurmada degdegga ah.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, booqo pha.site/vaccinations ama www.nidirect.gov.uk/childhood-immunisation



Public Health Agency
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Find us on:

Daabacaaddan waxaa laga soo qaatay macluumaad asal ahaan ay soo saartay Hay'adda Amniga Caafimaadka ee UK waxaana lagu isticmaalaa Laysinka Furan ee Dowladda v 3.0

Tallaalka loogu talagalay dhallaanka dhiciska ah



“ Labada waxqabad ee caafimaadka dadweynaha ee saameynta ugu weyn ku yeeshay caafimaadka adduunka waa **biyo nadiif ah iyo tallaalo.** ”

Ururka Caafimaadka Adduunka (World Health Organization)

Waa maxay tallaallada oo waa maxay sababta loogu baahan yahay?

Tallaal qaadashadu waa hab aan iskaga difaacno cudurrada halista ah. Waxaa jira cudurro dili kara carruurta ama sababi kara in dhaawacyo waara ay soo gaaraan caafimaadkooda. Tallaallada waxaa loo bixiyaa si habdhiska difaaca jirka ee ilmahaaga (nidaamka difaaca dabiiciga ah ee jirka) loogu diyaar gareeyo la dagaalanka cudurradaas marka ilmahaaga uu la kulmo cudurrada.

Goorma ayay tahay in ilmahaaga la tallaalo?

Waa muhiim in ilmahaaga uu tallaalladiisa qaato da'da saxda ah (eeg bogga dambe). Tani waxay gacan ka gaysan doontaa in laga hortaggo khatarta ah in ilmahaaga uu qaado cudur halis ah hadba sida ugu macquulsan. Khatarta waxyeellooyinka gaarka ah ee ka dhasha tallaallada qaarkood ayaa kordhi kara haddii aad dib u dhigto.

Ilmahayga waa dhicis oo wuxuu dhashay goor hore. Goorma ayay tahay in dhallaanka dhicisoobay ay qaataan tallaalkooda ugu horreeya?

Ilmaha dhicisoobay waxay halis sareysa ugu jiraan caabuq. Waa in la tallaalaa iyadoo la raacayo jadwalka tallaalka ee lagu taliyay laga bilaabo da'ada 8 toddobaad ka dib dhalashada, iyadoon loo eegin muddada ay dhicisoobeen. Tani waxay dhici kartaa inta ilmahaaga uu ku jiro isbitaalka, waxaad u baahan doontaa inaad arrintan kala hadasho dhakhtarkaaga.

Ilmaha qaarkood waxaa laga yaabaa inay baahdaan tallaallo dheeraad ah wax yar ka dib marka ay dhashaan haddii ay ku jiraan halis sareysa. Tusaale ahaan, carruurta khatarta sare ku jirta qaarkood waxay qaadan karaan tallaalka RSV si looga difaaco fayraska neefsashada ee isku-dhafka ah (respiratory syncytial virus) inta lagu jiro bilaha xilliga qaboobaha. RSV waa wax caadiyan sababa nooc ka mid ah caabuqa laabta/xabadka wuxuuna noqon karaa mid halis ah. Khabiirka, dhakhtarka ilmahaaga ama booqdaha caafimaadka ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah haddii ilmahaaga uu u baahan yahay difaac dheeraad ah.

Maxaa dhacaya xilliga ballanta?

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa kuu sharxi doonaan hannaanka tallaal qaadashada, waxayna kaaga jawaabi doonaan su'aalo kasta oo aad qabtid. Tallaalka waxaa lagu duraa muruqa bowdada. Haddii ilmahaaga uu dhaksho u dhicisoobay, markaas waxaa laga yaabaa inay ku sii jiraan isbitaalka ilaa laga gaaro wakhtiga qaadashada tallaalka caadiga ah ee ugu horreeya.

Ma jiraan sababo ay tahay in ilmahaaga aan la tallaalin?

Waxaa jira sababo aad u yar oo ay tahay in ilmahaaga aan la tallaalin. Tallaallada waa inaan la siin carruurta:

- falcelin xasaasiyadeed oo la xaqiijiyay (falcelin xasaasiyadeed oo aad u daran) oo ka dhan ah qiyaas hore oo tallaalka ah, ama
- falcelin xasaasiyadeed oo la xaqiijiyay oo ka dhan ah neomycin, streptomycin, ama polymyxin B (antibiyootikada loo isticmaalo tallaallada).

Haddii habdhiska difaaca jirka ee ilmahaaga uu 'culays saarmo' (sabab la xiriirta inay qaadanayaan daaweyn loogu talagalay xaalad caafimaad oo halis ah sida xubin-ku-beerid ama kansar), markaas ilmahaaga ma qaadan karo tallaallada qaar. Dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka waa inay talo ka helaan khabiir.

Ma jiraan sababo kale oo caafimaad oo aan tallaalladan la bixin karin.

Wax ka qabashada waxyeellooyinka gaarka ah ee caamka ah

Waxaa jiri kara casaan noqosho, xanuun ka dareemis ama jilicsanaanta meesha laga duray oo carruurta ayaa yeelan karaan qandho khafiif ah. Xaqiiji inaad ilmahaaga qaboojiso adigoo:

- siinaya dareere/cabitaan badan;
- xaqiijinaya inaysan saarnayn lakabyo badan oo dhar ama bustayaal ah;
- siinaya barastamoolka dhallaanka ee dareeraha ah - qiyaasta la siinayo ka hubi dhakhtarkaaga.

Qandhaad ayaa aad u badan ka dib qaadashada tallaalka MenB. Si looga hortago arrintan, waxaa lagu talinayaa in ilmaha la siiyo saddex qiyaasood oo barastamoolka dhallaanka ah ka dib qaadashada tallaalladooda MenB marka ay jiraan 8 iyo 12 toddobaad. Waa muhiim inaad qiyaasta la siinayo ka hubiso dhakhtarkaaga.

i Carruurta ka yar 16 sano ha siinin daawooyin ay ku jiraan aspirin.

Haddii aad ka walaacsan tahay ilmahaaga wakhti kasta markaa ku kalsoonow dareenkaaga oo la hadal dhakhtarkaaga guud.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaallada, waxyeellooyinka suurtagalka ah, barastamoolka iyo meningitis (cuurka qoorgooyaha), eeg **Tallaalka loogu talagalay carruurta ilaa hal sano jirka ah.**



Ka digtoonow meningitis (caabuqa maskaxda) iyo septicaemia (sumowga dhiigga)

Tallaallada Hib, MenB, iyo pneumococcal waxay ka hortagaan bakteeriyada ugu wayn ee carruurta iyo dhallinyarada u keenta meningitis iyo septicaemia. Si kastaba ha ahaatee, maadaama cudurradan ay sababi karaan bakteeriyado iyo fayrasyo kale oo badan, waa muhiim inaad ogaato calaamadaha iyo astaamaha cudurradan.

Astaamaha hore ee meningitis-ka waxaa ka mid ah qandho, xanaaq iyo nasasho la'aan, matag iyo cunto diidis – astaamaha sidoo kale la midka ah kuwo hargabka iyo ifilada. Laakiin ilmaha qaba meningitis ama septicaemia wuxuu noqon karaa mid aad u xanuunsada saacado gudahood.